



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 16 ^{aad}
Taariikhda: 01-27-2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:18 AM	Saacadda uu Xirmay: 11:57 AM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku- xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade)	Guntanka Kulanka: 29 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiiru dowlaha wasaaradda caafimaadka Marwa Maryan Maxamed Xusen 2. Wasiiru dowlaha wasaaradda batroolka iyo macdanta mudane Cabdiwahab Cumar Cabdi	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka 2. Ansixinta Ajendaha 3. Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Daawada. 4. Akhrinta 1aad ee Hindise Sharciyeedka Macdanta JFS. 5. IWK

Furitaanka Kulanka:

Senator Xuseen Maxamed Daahir ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Adeegga Bulshada, Arrimaha Bini'aaddannimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka ee Golaha Aqalka Sare ee BFS Pro. Dr. Senator Cusman Maxamed Maxamuud Dufle. si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Daawada. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha ku-xigeenka 2aad Golaha Aqalka ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise-sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Daawada, waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: 1 senator

Diidmo: Majirin

Ansixinta kaddib, Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa u yeeray Wasiiru dowlaha wasaaradda caafimaadka Marwa Maryan Maxamed Xusen si ay Senatarada uga mahadceliso ansixinta Hindise-sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Daawada.

Intaas kaddib, Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa u yeeray Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Batroolka Iyo Macdanta Mudane Cabdiwahab Cumar Cabdi si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 1aad ee Hindise Sharciyeedka Macdanta JFS.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Daawada.
3. Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa faray maamulka Golaha in Hindise-sharciyeedka Macdanta JFS loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.

Ugu dambayntii, Guddoomiye ku-xigeenka 2aad Senator Cabdulaahi Cali Xirsi (Tima cade) ayaa kulanka soo xiray sacadu markay ahayd **11:57 AM**.

DHAMAAD